

**Foomka Gaaban ee Cilmi-baarista ee Lagu-Sameeye
yaalka Baarista Dadka-aan- Af-Ingiriiska ku hadlin
Ogolaanshaha loogaga qeybgalayo Daraasad Cilmi-baaris**

Cinwaanka Daraasada:

Baaraha Aasaasiga ah:

Waxaa lagu warsaday inaad ka qeybqaadato daraasad cilmi-baarist ah.

"Adiga" waxay carrabbaabaysaa adiga, cunugaaga ama qof aad mataleyso danahooda ugu wanaagsan

Kahor intaadan heshiiska gelin, baaraha (cilmi-baaraha) waa inuu kaaga Hadlaa:

1. Sababta aay daraasadan usameynayaan
2. Ilaa iyo inta ay daraasadani qaadan doonto
3. Hababka wax lagaaga qaban doono
4. Hababka la xiriira tijaabinta
5. Halis ama qaxar kasta ay ka garanayaan
6. Wax kasta oo adiga ama dadka kale faa'iido u leh
7. Hababka ama daaweysyada kale ee badalkooda isku dayi laheyd
8. Sida loo gaar yeelaayo, loona nabad gelinaayo warbixintaadi.

Markey haboontahay, baaraha wuxuu sidoo kale kuu sheegi doonaa:

1. Qorsha lacag bixinta iyo/ama daaweysyada caafimaadka haddii aad u dhaawacanto sababo la xiriira daraasada
2. Waxaa jiri karta halisyo adiga kugu yimaadaan oo uusan baaruhu waxba ka ogeyn
3. Waa lagaa saari karaa daraasada waqti kasto, xitaa haddaad adigu doonayso inaad ku jirto
4. Wax ku saabsan kharash kastoo dheeraad ah adiga kugu kacay inta aad daraasada ku jirtay
5. Wax ku saabsan warbixin kasta oo cusub oo maskaxdaada bedeli kari laheyd oo aad ula rabootay inay ku jiraan daraasada
6. Inta qofood oo daraasada ku jiri doonto

Haddaad su'aalo qabto oo ku saabsan xuquuqdaada ka tabaruce cilmi-baaris ahaan, ku dhaawacma, ama aan ku faraxsaneen qayb kastoo kamid ah daraasada, waxaad wici kartaa Guddiga Dib-u-eegida Hay'adaha Gobolka ee Mercy Health (Mercy Health Regional Institutional Review Board, IRB), teleefanka 616-685-6198 si aad ula hadasho shaqsi ka war qaba oona qeyb ka aheyn cilmi-baaristan. Waxaad kaloo cilmi-baaraha kala soo xiriiri kartaa,

_____ ee _____ ee waqtikasta
haddaad su'aalo qabto oo ku saabsan daraasada. Kaqeybqaadashada daraasadani waa iskaa. Waxad joojin kartaa ka qeybgalka markasta, mana laguu ciqaabi doono ama ma lumi doonto faa'iido kasta.

Bayaanka Lagu-sameeyaha Daraasada ama Lagu-sameeyaha Daraasada Wakiilkiisi Sida-Sharciga ah loo Ogolaaday

Adigoo foomkan sixiixaya, waxaad ogolaanaysaa in daraasadani si oraah ah laguugu sharaxay afkaaga, oo si rabitaan leh u ogolaato inaad uga qeyb qaadata daraasadani. Waxaad fursad u leedahay inaad su'aalo ka weydiiso jawaabana aad ka hesho oo si buuxda uga jawaabaya su'aalahaas.

Haddaad ogolaato inaad gasho daraasadani, waxaa lagu siin doonaa nuqul oo foomkan sixiixan ah. Waxaa kaloo lagu siin doonaa nuqul qormo af-ingiriisi ah ee Foomka ogolaansha ka qaybqaadashada daraasada ee lagu-sameeyaha daraasada/baarista.

Sixiixa Lagu-sameeyaha Daraasada ama Wakiilka
Sida-sharciga-ah Loogu-ogolaaday

Taariikh

Magaca Lagu-sameeyaha Daraasada oo Daabacan

Bayaanka Markhaatiga

Waxaan cadeynayaa soo bandhigid oraah ah inuu si buuxdo oo sax ah ugu turjumay turjumaanka caafimaadeed ee Mercy Health afka _____, iyo inaan xaadir u ahaa ka hawl-galka kaamilka ah ee ogolaashaha ka qaybgalka daraasada ee lagu-sameeyaha daraasada.

Sixiixa Markhaatiga

Taariikhda

Magaca Markhaatiga oo daabacan

Bayaanka Turjumaanka

Waxaan cadeynayaa inaan lagu-sameeyaha daraasada afkiisi aasaasiga ah ugu tarjumay dhamaan khudbooyinka oraahda ah oo ay soo bandhigeen dadkii xaadirka ahaa kulligoodi intii ay socotay hawlqabsiga ogolaanshaha ka qaybgalka daraasad ee lagu-sameeyaha daraasada.

Sixiixa Turjumaanka

Taariikhda

Magaca Turjumaanka oo sixiixan

*Ugu nogo foomka ogolaanshaha ka qaybgalka daraasada ee lagu-sameeyaha daraasada (Qormo af-ingiriisi ah) sixiixyada taariikheysan ee baaraha iyo qofka helaya ogolaashaha.